

Koorsooyinka af-iswiidishka ee luqad labaad ahaan loo barto

Kaaliyaha/kalkaalisada daryeelka [Vårdbitråde], Xannaanadda ilmaha, Daahroog/baro dalka Iswiidan, Badso barashada af-iswiidisha, SAS Grund

Waa koorsooyin loogu talagalay qofka adigoo kale ah, oo inyar garanayo af-iswiidishka, oo laakin u baahan in u aqoon korarsado sidii u taclintiisa ugu sii wato dalka Iswiidan. Koorsooyinka waxay ku habboon yihiin qofka SFI-nivå kaga sugan heerarka B, C ama D.

Muddada heerka aasaasiga ah ee koorsooyinka la dhigto waa 1 sano. Ardayga dhigto koorsooyinka wuxuu xaq ku leeyahay deqda/deynta waxbarashada [Studiemedel] oo ay Hay`adda arrimaha waxbarashada [CSN] bixiso.

Koorsada kaddib waxaa ardayga la siiyaa *caddayn*.

Waxaad heli kartaa fursad aad ku samayso imtixaanada [SFI-prov] C iyo D, kaddib waxaa lagu siin karaa *shahaadada* koorsada [SFI]. Sidoo kale waxaad haysata fursad lagugu siiyo *shahaadada* koorsada [Sas Grund]. Macallinkaaga ayaa qiimayn karaa haddii aad ku guulaysatay ama in kale.

Dugsiga waxaa la dhigta isniin-jimce qiyaastii saacadaha 9.00-16.00

Ardayda kulliyadaha koox ahaan ayay wax u bartaan. Wax badan ayuu ardayga la kulma macallinka iyo saaxiibada fasalka. Waxaa la helaa wakhti oo ardayga ku helo caawinaad iyo taageerada waxbarashada. Tan kale, waxyaala badan ayay ardayda wadajir u samayn karaan, sida tusaale in ay booqdaan madxaf, masrax, shileemo iyo goobaha carrogeddisyada. Luqadda si dhaqsi badan ayaa lagu bartaa markii la wada joogo oo lagu hadlayo af-iswiidishka. Ka helid ayay leedahay wuxuun qofku yeelan karaa saaxiibo badan! Ku soo-dhowoowaada koorsooyinka!

Barta internetka ka aqriso warbixin dheeraad oo ku saabsan koorsooyinka, isla bartaas ayaa ka soo gudbin kartaa codsigaaga www.sundbybergsfolkhogskola.se Ama booqo dugsiga kaddib codsigaaga halkaas noogu keen. Adreeska waa: Kasernvägen 1 i Rissne. U dhow T-bana Rissne. Taleefan: 08 445 39 00